# Manus
# TRYGG NETTHANDEL

Qoraalkan waxaa lala isticmaalayaa qoraalka sawirrada wata ee PowerPoint ga ee *Baro in si ammaan ah internetka wax looga iibsado. Lambarka qodobka iyo lambarka qoraalka sawirka wata ee* PowerPoint ga waa isku mid. Qodobka 1aad wuxuu u dhigmaa qoraalka sawirka wata ee 1aad (bogga 1aad) ee PowerPoint ga. Qodobka 2aad wuxuu u dhigmaa bogga 2aad iwm. Isla qoraalkan ayaa bog walba oo kuwa sawirrada wata ah hoostiisa ku qoran.

Qoraalka ku qoran **khadda dhalaalaysa** waa faallo loogu tala galay qofka koorsada dhigaya. Qoraalka ku qoran FARTA WAAWEYN waa ciwaan. Qoraalka intiisa kale kor ayaa loo akhrin karaa ama qofka koorsada dhigaya ayaa isticmaali kara marka uu dadka wax barayo.

## Qoraal

1. **Inta aadan koorsada billaabin dadka koorsada dhiganaya u sharrax hadafka waxbarashadaan laga leeyahay. Waxay taasi u fududayn doontaa in ay wax bartaan oo ay xasuustaan waxyaalaha ugu muhiimsan.**
   **Xusuuso in ay dukaammada internetku kala duwan yihiin, oo wakhti sii aad wixii su'aalo ah uga jawaabto inta uu cashirku socdo.**
   **Waxaa wanaagsan in aad dadka koorsada dhigta ka codsato in ay horey u soo qaataan kaar bangi, kaarka deynta iyo lambarrada ammaanka [betalingsbrikker] si ay internetka wax uga iibsadaan marka uu cashirku dhammaado.**

2. WAA MAXAY DUKAANKA INTERNETKA?

   Qaar ka mid ah dukaammada internetka ayaa alaab ama dhar laga iibsadaa, laakiin waxaa iyana suurtaggal ah in laga dalbado adeegyo sida safarro, in qol hoteel la qabsado iyo waxyaalo kale oo badan.

   Dadka qaar baa dukaammada internetka wax uga iibsada si ay wakhti iyo lacag ba ugu dhaqaaloobaan. Meesha qaar kale ay aamminsan yihiin in ay internetka ka helaan waxyaalo iyo adeegyo aanay meelo kale ka helayn.

   Marka uu qofku internetka wax ka iibsanayo, waxa koowaad waa in uu helo dukaanka internetka ee uu isticmaalayo. Waxay u badan tahay in ay dadka badankoodu horey u sii og yihiin dukaanka interneka ee ay isticmaalayaan. Haddii aad og tahay badeecada aad doonayso in aad iibsato, laakiin aadan aqoonnin dukaammada internetka ee iibiya badeecadaas, waxaad markaas isku dayi kartaa in aad internetka ka raadiso ama google – oo bal aad eegtid in ay kuu soo baxaan dukaammo badeecadaas laga iibsan karo.

3. Halkan waxaa ah tusaalayaal dukaammo internetka ah oo kala duwan.

4. Halkan waxaa ah tusaalayaal dukaammo internetka ah oo kala duwan.

5. Halkan waxaa ah tusaalayaal dukaammo internetka ah oo kala duwan.

6. Halkan waxaa ah tusaalayaal dukaammo internetka ah oo kala duwan.

7. Dukaammada internetka intooda badan si isu dhaw ayay u qaabaysan yihiin.

8. Inta badan waxa ugu horreeya ee aad arkayso waa bog aad badeecada ka raadin karto, warbixinteedana ka akrisan karto.

9. Bogga waxaa ku jira "dambiisha adeegga" halkaas oo ay galayaan badeecada iyo adeegyada aad doonayso in aad iibsato.

10. Badeecada aad doonayso riix si aad u doorato.

11. Sida dukaammada caadiga ah oo kale ayaad iibsan kartaa hal shay ama dhawr shay.

12. Sida dukaammada caadiga ah oo kale ayaad iibsan kartaa hal shay ama dhawr shay.

13. Waxaad sidoo kale iibsan kartaa badeeco kala duwan.

14. Wixii aad doonaysay in aad gadato oo dhan markaad dambiisha ku riddo ayaad maqalka raadinaysaa si aad lacagta u bixiso. Haddii aad riixdo "iibso" waxaad arkaysaa in badeecadii dambiisha lagu riday.

15. Haddii aad riixdo "iibso" waxaad arkaysaa in badeecadii dambiisha lagu riday.

16. Hadda hal shay ayaa dambiisha ku jira.

17. Haddii aad qaar kale ku darto waxaa lagu arkayaa dambiisha.

18. Waxaa kale oo ay dukaammada internetku leeyihiin "maqal" ama meeshi laga baxayay halkaas oo loo baahan yahay in aad ku xaqiijiso waxa aad iibsanayso, sheegaysid sida aad u bixinaysid iyo sida ay badeecadu kugu soo gaarayso. Qaybtaan waan u soo laaban doonnaa.

19. Dukaammada internetku way kala duwan yihiin.
    Qaar baa isticmaala ereyo kale oo aan ahayn "dambiisha adeegga" iyo "maqal". Meelaha qaarkood waxaa ku qoran "dalbo" ama "ku rid dambiisha adeegga".

20. Qaar dukaammada internetka ka mid ahna luuqado kale ayay ku qoran yihiin. Laakiin nidaamka aad raacayso waa isku mid.
    1. Hel badeecada/badeecadaha aad doonayso in aad iibsato.
    2. Maqalka aad marka aad diyaargaraqdo.

3. Bixi lacagta badeecada.

21. SIDAAN AYAAD LACAGTA U BIXINAYSAA

22. Waa in aad maqalka heshaa si aad lacagta u bixiyo. Sida ugu fudud ee lagu heli karo waa adiga oo dambiisha adeegga taabta. Sida caadiga ah waxaad halkaan ku arkaysaa badeecada aad dooratay, waxaadna ka sii aadi kartaa maqalka. Raadi batoon ama bog ay ku qoran tahay "Maqalka aad", "Lacagta bixi", "Adeegga dhammee" ama wax la mid ah oo kuu suuragelinaya in aad adeegashada dhammayso.

23. Waa in aad maqalka heshaa si aad lacagta u bixiyo. Sida ugu fudud ee lagu heli karo waa adiga oo dambiisha taabta. Sida caadiga ah waxaad halkaan ku arkaysaa badeecada aad dooratay, waxaadna ka sii aadi kartaa maqalka. Raadi batoon ama bog ay ku qoran tahay "Maqalka aad", " Lacagta bixi", " Adeegga dhammee" ama wax la mid ah oo kuu suuragelinaya in aad adeegashada dhammayso.

24. Sida caadiga ah marka aad maqalka tagto waa in aad warbixinta soo socota dukaanka internetka siisaa si aad wax u iibsato:

25. Magaca iyo ciwaanka qofka ay badeecadu ku socoto (waxaad dooran kartaa in aad badeecada u dirto qof aad saaxiibbo tihiin ama xubin qoys)

26. Magaca iyo ciwaanka qofka lacagta bixinaya, waxaa sida badan loogu yeera ciwaanka qofka lacagta bixinaya (kaasi waa adiga)

27. Ciwaankaaga iimaylka iyo lambarkaaga taleefanka (weliba lambar taleefan gacan)

28. Sida lacagta lagu bixinayo. Waxaa inta badan la kala dooran karaa in warqad lacag-doon laysu soo diro, in kaar bangi lagu lagu baxsho ama hab kale oo lacagaha lagu baxsho.

29. Haddii aad kaar bangi ku bixinayso waa in aad bixisaa magaca mulkiilaha kaarka, lambarka kaarka iyo taariikhda uu kaarku dhacayo (waxay ku qoran tahay dhinaca hore ee kaarka) iyo CVC (tanna waxay ku qoran tahay dhabarka kaarkaaga. CVC waa saddexda lambar ee ugu danbeeya ee midigta ugu xiga, kuna yaalla laynka saxiixaaga).

30. Ka hor inta aadan wax iibsannin waa in aad sidoo kale aqbashaa shuruudaha iibka ee dukaanka internetka ee aad wax ka gadanayso.

    Shuruuduhu waxay inta badan ku qoran yihiin liisas u muuqan kara kuwa dhaadheer oo aan la akhrin karin. Laakiin haddana waa muhiim in aad wakhti siiso oo aad dul marto, si aad u ogaato waxa aad aqbalayso.

    Si fiican u akhri qaybaha ku saabsan keenista, baajinta dalabka, celinta badeecada iyo xaqa

aad u leedahay in aad beeca ka noqoto.

31. Marka aad waxyaalahaan ogaato ayaad istillaab saari kartaa meesha aad ku sheegayso in aad aqbashay shuruudaha iibka haddii aad weli doonayso in aad badeecada gadato.

    Qodob muhiim ah oo iibka la xiriira ayaa ah in aad adiga oo iibsade ah dusha u dhihato waajibka ah in aad bixinayso lacagta badeecada. Dukaanka internetka ee aad wax ka gadanayso ayaa loo baahan yahay in uu si wanaagsan kuugu wargeliyo arrintan iyo xaqa ka noqoshada iibka.

    Nidaamka iibka way ku kala duwanaan karaan dukaammada internetka ee kala duwan, sidaas darteed waa in aad tilmaamaha shaashadda si wanaagsan ula socotaa.

32. Marka uu iibku dhammaado waxaad tagaysaa bog ay ku qoran tahay in dalabkaagi la helay. Inta badan waxaa dhacda in laguu soo diro iimayl xambaarsan macluumaadka dalabkaagi. Qaar badan oo ka mid ah dukaammada internetka ayaa iyagana dadka u dira iimayl marka baakadda la soo diro, si aad ula socoto xaaladda badeecadii aad dalbatay.

33. Marka la soo koobo, tillaabooyinka soo socda ayaa loo baahan yahay in aad had iyo jeer marto marka aad badeecad internetka ka gadanaysid:
    Hel dukaan internetka ah

34. Badeeco dooro

35. Badeecada ku rid dambiisha

36. Aad maqalka

37. Qor ciwaanka qofka loo dirayo

38. Qor ciwaanka loo dirayo warqadda lacag-doonka

39. Qor lambar taleefan gacan iyo iimayl

40. Dooro habkii aad lacagta ku bixin lahayd, iyo wixii warbixinno ah ee la xiriira

41. Akhriso shuruudaha iibka

42. Aqbal shuruudaha iibka

43. Hubi in aad hesho caddaynta dalabkaagi.

    Waxay u ekaan kartaa shaqo badan, laakiin way fududdahay marka aad la qabsato.

Dad badan ayaa ka baqa in la khiyaano marka ay internetka wax ka iibsadaan. Fursadaha ay ay taasi kugu dhici karto aad ayay u yar yihiin haddii aad wax ka iibsato dukaammada internetka ee la yaqaanno ee aad wax looga iibsado, laakiin si kastaba waxaa jira qodobbo loo baahan yahay in aad xusuusato.

44. SIDEE LOOGA HOR TAGAA IN LAGU KHIYAANO?

Dad ayaa ka baqa in la khiyaano haddii ay internetka wax ka iibsadaan, laakiin waxaa jira qodobbo haddii aad maskaxda ku hayso aad hoos u dhigeyso khatarta aad taas ugu jirto.

Qodobbadaan ayaan hadda dul maraynaa.

45. Qodobbo ay wanaagsan tahay in maskaxda lagu hayo marka internetka wax laga iibsanayo ayaa ah:

Wax ha ka iibsan meel aadan ku kalsoonayn. Haddii uu shaki ku galo waxaad had iyo jeer hubin kartaa in lambarka taleefanka iyo ciwaanka dukaanka internetku in ay yihiin kuwo dhab ah oo jira, saxna ah.

46. Hubi in adeeggu ammaan yahay. Fiiri ciwaanka bogga internetka ee ku qoran barta ciwaanka lagu qoro. Haddii ay ku qoran tahay https, ama barta ciwaanka lagu qoro aad ku aragtid sawir quful – markaa macluumaadka aad halkaas geliso way xafidan yihiin oo dad kale dhexda kama qabsan karaan.

Ha dhiibin warbixin adiga kugu saabsan iyo midda kaarka aad lacagta ku bixinayso midna haddii aadan https ama qufulkii aadan ku arag barta ciwaanka lagu qoro.

47. XUSUUSO: Marka aad internetka wax ka iibsanayso waxaad dukaanka internetka ee aad wax ka gadanayso siinaysaa keliya lambarka kaarkaaga, taariikhda uu dhacayo iyo lambarrada hubinta (CVC). Haddii laguu sii diro bog kale oo lagaa codsado in aad dhiibto kuude aad kala soo baxdo makiinadda yar ee kuudaha [kodebrikke] iyo ereyada furaha ah, waad bixin kartaa kuwaan. HA bixin PIN kuudahaaga.

Marka aad internetka wax ka gadanayso waxaa wanaagsan in aad isticmaasho kaarka deynta.

Marka aad internetka wax ka iibsanayso haddii aad bixiso warbixinta kaarkaaga deynta, lacagta koontada lagama goynayo ee waxaa lagu diiwaangelinayaa in lagu leeyahay kaarkaaga deynta.

Markaas waxaad helaysaa wakhti fiican oo aad lacagta ku hubiso oo badeecadu kuugu timaaddo ka hor inta aadan lacagta bixin. Haddii aysan badeecadu ku soo gaarin, ama haddii

ay cillad leedahay ama wax ka maqan yihiin, xuquuq fiican ayaad leedahay marka aad lacagta ku bixisay kaarka deynta.

Mid kasta oo aad wax ku gadanaysid ba – kaar deyn ama kaar bangi oo caadi ah, marna looma baahna in aad bixiso PIN kuudaha kaarkaaga (PIN-kuuduhu waa 4-ta lambar ee aad garaacdid marka aad bangiga derbiga lacag kala baxaysid ama aad tagto meel aad kaarka wax ku iibsanayso).

La soco koontadaada bangiga. Haddii aad aragto dhaqdhaqaaq aadan ogeyn, ama mid aad u malayso khiyaano, waa in aad bangigaaga la xiriirtaa. Iyaga ayaa kaa caawinaya in ay ogaadaan waxa dhacay.

48. Waa in uu shaki ku galaa haddii lagu yiraahdo koonto lacag ku rid si aad ugu bixiso badeecada aad iibsan doonto.

    Haddii aad noocaan lacag u bixiso xaquuqdaadu way yaraanaysaa, waxaana adkaan karta in lagu caawiyo haddii aad damacdo in aad beeca ka noqoto ama ay badeecadu imaan weydo.

49. La soco oo hubi in ay badeecadu ku timaaddo wakhtiga uu dukaanka internetku ku sheegay shuruudaha iibka. Haddii aysan badeecadu imaannin, markaas ma aha in aad lacagtii badeecada bixiso. Markaas waa in aad bangigaaga la xiriirtaa.

50. **Wakhti ku qaado oo caawi qofkii doonaya in uu internetka wax ka dalbado.**

    **Waxaa iyana wanaagsan in aad diyaariso liis lagu xasuusto heerarka kala duwan iyo qodobbada (oo weliba sawir leh) oo aad u qaybiso ka-qaybqaatayaasha koorsada.**